

Warbixin muhim ah oo loogu talagalay qofka boos ka codsaday ama ka codsan doono dugsiga xannaanadda ama goobaha wakhtilummiska

Adeegga farsamada elektroonikada ku salaysan oo cusub oo loogu talagalay dugsiga xannaanadda iyo goobaha wakhtilummiska

Laga bilaabo 4 nofeembar 2015 waa in xilhaayaha xannaanadda/waalidka laf ahaantiisa codsaa isagoo adeegsanaayo adeegga farsamada elektroonikada ku salaysan ee cusub ee loogu talagalay in boos laga dalbado dugsiga xannaanadda ama goobaha wakhtilummiska. Isbedelkaan wuxuu kaloo saamayn ku yeelan doonaa qofka adigoo kale ah oo ubadkiisa lagu xannaanadeeyo dugsiga xannaanadda gaar ahaanta loo leeyahay. Adeegga farsamada elektroonikada ku salaysan iyo warbixin dheeraad waxaad ka heli kartaa shabakadda internetka www.norrkoping.se/ansokanforskola

Arrimahaaga oo idil waxaa laysu geenayaa Bogga aad ku leedahay adeegga farsamada elektroonikada ku salaysan. Waxaad:

- Halkaas ka codsan kartaa boos
- Wargelin kartaa inaad booska doonayn
- Wax ka beddeli kartaa saacadaha xannaanadda (waa haddii waxbarasho bilaawdo, shaqo ama shaqo la'aan kugu dhacdo)
- Wax ka beddel daqliga
- Wax ka beddeli kartaa warbixin-shaqsiyeedkaaga (diiwan-geli adres e-mail iwm)

Xannaanadda way xiran tahay laga bilaabo 21 oktoobar ilaa 4 nofeembar. Muddadaas suurtagal ma ah boos ka codsashada dugsiga xannaanadda ama goobaha wakhtilummiska.

Kharashka ugu badan oo wax laga beddelay

Isku-darka daqliga qoyska waa 42 890, taasoo hirgashay koowdii bisha luulyo 2015. Kharashka ugu badan waxaa go'aan ka gaarto dowladda, kolba inyar ayaa lagu kordhiyaa. Sidaas awgeed, waa muhim inaad na wargeliso warbixin sax ah oo ku saabsan daqliga. Xitaa haddii daqligaaga u ka badan yahay kharashka ugu sareeyo. Waxay taasi suurtagelinaysaa in laga qaado kharash sax ah. Haddii aad waxba ka beddelin ama na wargelin inta daqligaaga u yahay, waxaa dhici karto inaad bixiso kharash aan waafaqsanayn daqliga. Markii maamulku u ku dhaqaaqo kormeerida daqliyada waxaa dhici karto in aad bixiso farqigii u dhaxeeyay kharashkii aad bixisay iyo kharashkii aad bixin lahayd.

Warqadda kharashyada lagu bixiyo oo la wada qaybsado

Waalidiinta carruurtooda lagu xannaanadeeyo dugsiga xannaanadda oo kala taga, waxaa midkiiba loo soo diri doonaa warqadda lacagta lagu bixiyo taasoo ku salaysan daqliga qoyska. Laga bilaabo koowda bisha jannayo 2016 waxaa xilhaayeyaash xannaanadda/waalidiinta kala tegay qasab ku ah in ay codsadaan in qof kasta loo soo diro warqadda lacagta lagu bixiyo oo gaar ah.

Kormeerida heerka kharashka la bixiyay.

Dowladda hoose Norrköping waxay goor dambe kormeerta inaad bixisay kharashka xannaanadda carruurta oo sax ah. Haddii aadan na wargelin warbixin daqliga xiriir la leh oo sax ah, waxaa waajib kugu ah inaad bixiso farqiqa u dhaxeeyay labada kharash, taasoo dhici karto laba sano kaddib. Warbixin dheeraad ku saabsan kormeerida kharashyada waxaad ka aqrisan kartaa www.norrkoping.se/avgiftskontroll ama na la soo xiriir adigoo adeegsanaayo adeegga farsamada elektroonikada ku salaysan.

Salaan wacan naga guddoon,

Linnea Lagnström

Madaxa maamulka

Xafiiska ammuuraha waxbarashada, Norrköpings kommun